

Sharci lamb. 4 ee 30 Janaayo1967

Sharciga lahaanshada Dowladda ee dhulka beeraha ah

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Kadib markii la arkay ansixidda Barlamaanka Qaranka.

WAXAA LA SOO SAARAY

Sharcigaan hoos ku qoran:

Qod. 1

Dhulka beeraha ah oo aan dad ajnabi ah aysan lahayn, amase aanan la iibinin ama ijaar dad shaqsi ah amase shirkado la gelinin waxay yihiin dhul ay dowladdu leedahay oo ay isticmaalkeedu leedahay.

Qod. 2

Dhul alla dhulkii horay loo siiyey shaqsiyaad ama shirkado ajaanib ah ka hor intii aanan xorriyadda la qaadanin oo ilaa iyo hadda aanan la tacbanin waxay dib ugu soo noqonayaan hanti dowladda.

Qod. 3

Dowladdu waxay ku tilaabsan doonta wax allaliyo wixii taakuleyn ah ee dhinaca qalabka beeraha iyo ka baajinta dhibista canshuuraha mashruuc kasta ee la xiriira horumarinta beeraha (cafiska POL).

Qod. 4

Sharcigaan wuxuu hirgeli doonaa 5 beri ka bacdi maalinta lagu soo daabaco Faafinta Rasmiga ah waxaana lagu keydin doona Keydka Rasmiga ah ee Shuruucda iyo Dekreetoyinka ee Jamhuuriyadda Somaliya.

Waxaa la farayaa cid kasto in ay u hoggansanato sharcigaan uuna hoggamiso cid kasta.

Muqdisho, 30 Janaayo 1967.

Aden Abdulle Osman

Rai'sul Wasaaraha

Abdirizak Haji Hussein

Wasiirka Beeraha iyo Xanaanada Xoolaha

Mohamud Abdi Nur